SIYAASAD KU SAABSAN SHURUUDAHA QALINJABINTA EE DUGSIYADA BOSTON PUBLIC SCHOOLS

LA AMARAY, in Guddiga Dugsiga ay halkan ku ansixiyaan Nidaamka lifaaqan ee la xiriira Shuruudaha Qalinjabinta ee Dugsiyada Boston Public Schools:

Nidaamkan, iyo sidoo kale Maamulayaasha Kormeerayay waxaa halkan lagu oggolaaday, inay ka caawin doonaan hoggaamiyeyaasha dugsiga, maamulayaasha, macallimiinta, iyo shaqaalaha inay gutaan waajibaadkooda iyadoo la tixgelinayo hubinta ardayda inay si siman u helaan shaqo koorso adag oo ka jirta guud ahaan degmada.

Marka codaynta, Amarka waxaa lagu ansixiyay codbixinta soo socota:

HAA–
MAYA–
M AQAN–

Ogaysiis:

Elizabeth A. Sullivan
Xoghayaha Fulinta
SIYAASAD KU SAABSAN SHURUUDAHA QALINJABINTA
EE DUGSIYADA BOSTON PUBLIC SCHOOLS

Arday kasta - iyada oo aan loo eegin isirka, qowmiyadda, jinsiga, naafonimada, nooca galmada, diinta, xaaladda muwaadinnimo, xaaladda dhaqan iyo dhaqaale, ama lambarka boostada - wuxuu u qalmaa waxbarasho aad u fiican, dhaqan ahaan iyo luqad ahaan la xiriirta iyo fursado ka caawiya inay gaaraan awooddooda buuxda. DDB waxay u adeegtaa ardayda kartida sare leh ee saameynta ku leh bulshada, nidaamyada iyo caqabadaha bulshada, iyo cunsuriyada ka jirta gudaha iyo banaanka dugsiga. Ku dhowaad 30,000 ardayda ee dugsiyada BPS (in ka badan 50% tirada ardaydayada) waxay leeyihiin baahiyo gaar ah sida Ardayda Ingiriisiga iyo/ama ardayda naafada ah, iyo/ama la kulma dhaqaale xumo. Ardayda Madow iyo Latinx waxay ka kooban yihiin 76% ee ardayga iska diiwaangelisa dugsiyada BPS. Taariikh ahaan, Madowga iyo Latinx, Ardayga Ingiriisiga, iyo ardayda naafada ah ayaa laga reebay marin u helida shaqo koorso ka adag oo ka mid ah goobaha waxbarashada guud ee loo dhan yahay heerar aan dheellitirnayn.

Tirtirida fursadaha iyo farqiga udhaxeeya, iyo xaqiijinta awooda aan dhamaadka laheyn ee ardaydeena si ay u xaqiijiyaan rajadooda iyo hamigooda ayaa udub dhexaad u ah himilada degmada ee hubinta in cunug kasta oo ku jira fasal kasta ee dugsi kasta uu helo waxa uu u

baahanyahay. Waxaan qaadi doonnaa ficil geesinimo leh, ula kac ah, iyo ficil cad si loo baabi'iyo fursadaha iyo farqiga u dhexeeya ardaydayada aadka u nugul.

Joogtaynta siyaasadaha ku riixaya ardayda xagga Kuleejka, Shaqada iyo U Diyaargarowga Nolosha iyo hubinta in shuruudaha qalin-jabintu ay yihiin kuwo isku mid ah, hufan, adag, oo iswaafajin ka ah degmada iyo in la hubiyo awoodda ay daneeyayaasheena ku aamini karaan ballanqaadka degmada ee sinnaanta ayaa muhiim u ah mas'uuliyaddan. Nidaamkani wuxuu xaqiijinayaa sida ay uga go'antahay degmadu inay siiso jawi waxbarasho oo adag oo loo siman yahay dhammaan ardayda, gaar ahaan heerka dugsiga sare, iyadoon loo eegin dugsiga ay ka diiwaangashan yihiin, waxayna ku maamulaan shuruudaha qalin-jabinta ee degmada oo dhan ee dhammaan ardayda Boston Public Schoo.

Markii la fulinayo siyaasaddan, Boston Public Schools ayaa hormarin doona iyo ilaaliyaa Kormeeraha Guud ee: (1) qeexida habraacyada joogtaynta nidaamyada si loo hubiyo in koorsooyinka ay yihiin kuwo adag oo waafaqsan heerarka DESE; (2) sharaxo nidaamyada gaarka ah ee dugsiga si loo helo ka dhaafitaan koorso adag; (3) qeex foomamka gaarka ah, liistada hubinta, oggolaanshaha iyo dabacsanaanta la oggol yahay; (4) qeexida geedi socodka caddaynta dhammaystirka shuruudaha qalinjabinta. Wareegtooyinkaan waxaa la hormarin doonaa kahor jadwalka 1-da Luulyo, 2022 ee hirgelinta waxaana loo soo bandhigi doonaa guddiga Iskuulka.

Si gooni ah, iyadoo la socota siyaasadan iyo Julaay 1, 2022, degmadu waa inay soo saartaa qorshe istiraatiijiyadeed sanadba sanadka kale ah oo ay kujiraan taakulaynta degmada iyo qorshooyinka ku saleysan dugsiga oo ay kujiraan kuwa soosocda:

(1) miisaaniyadaha dugsiga si buuxda loo hirgaliyo;
(2) Samaynta nidaamyo ku saabsan habsami u socodka howlaha ururada ee xafiiska miisaaniyada iyo hogaamiyaha miisaaniyada dugsiga FY23;
(3) aqoonsiga saamaynta ka timi luminta wax barasha cudur faafa awgeed ee dadka nugul ee ka koobnaan doona da' weyn iyo ardayda dhibcaha hooseeya keena, ardayda naafada ah, iyo kuwa barta luqadda Ingiriiska;
(4) caddeyn muujineysa in dugsiyadu ay la kulmeen dhacdooyin muhiim ah oo xagga fulinta ah;
(5) hannaan hufan oo lagula xisaabtamo Guddiga Dugsiga iyo bulshada; Tan waxaa ku jira warbixin saddex biloodle ah oo loo gudbiyo Guddiga Iskuulka
(6) nidaam lagu hubinayo in ardayda naafada ah oo dhan inay helaan MassCore iyada oo wax laga beddelayo sida ay go'aamiyeen kooxda IEP ee ardayga;

(7) hannaan loogu talagalay ardayda barta luqadaha badan iyo Ingiriisiga ee loogu talagalay in lagu abaal mariyo luqadeed ee ay horay u heleen;
(8) howlaha dib u qorista ee ardayda ka dhigta koorsooyin horay loo dhammaystiray (oo ay ku jiraan kuwo caalami ah);
(9) qeexitaanka hababka loo maro qalinjabinta ardayda uqalma MCAS-Alt;
(10) qeexitaannada habraacyada ka dhaafitaanka koorsada ee adag si looga faa'iideysto ardayda gebi ahaanba ka diiwaangashan hay'adaha tacliinta sare, shaqada iyo barnaamijyada, ama waddooyinka kale ee la dedejiyey, oo ay ku jiraan Cutubka 74 xirfadaha iyo barnaamijyada waxbarashada farsamada;
(11) habsocodka aqoonsiga koorsooyinka fasalka dhexe ee la jaanqaadaya barnaamijka adag ee MassCore iyo hubinta in ardayda si habboon loogu abaal mariyo dhammaystirka guusha ee koorsooyinkaas;
(12) geeddi-socodka iyo shuruudaha lagu waafajinayo oggolaanshaha koorsada heerarka iyo shuruudaha DESE;
(13) nidaamka lagu hubinayo in dhammaan ardayda ay helaan fursad ay ku muujiyaan inay si fiican u aqoonsan yihiin nuxurka si ay;
(14) nidaamka loogu qoondeeyo ardayda mujiiyay aqoontooda iyo aqoontooda luqada(daha) aan ka ahayn Ingiriisiga iyadoo la kulmaya talooyinka MassCore;
(15) nidaamka lagu hubiyo in ardayda lagu abaalmarin karo buundo marka ay muujiyaan aqoontooda nuxurka, inkasta oo aysan qaadanin "waqtiga fadhi" ee koorsada loo baahan yahay;
(16) nidaamka loogu talagalay ardayda ka diiwaangashan barnaamijka mihnadlaha iyo barnaamijka waxbarashada farsamada ee daraasadaha si ay u helaan ikhtiyaarka ah ka bixitaanka Luqadda iyo Farshaxanka oo ay weli dhammaystiraan MassCore.
(17) Nidaam isbarbar socda laakiin gooni ah oo loogu talagalay ardayda ka diiwaangashan dugsiyada waxbarashada kale iyo barnaamijyada la jaan qaadaya wajiga shanta sano ee degmadu sheegtay ee jadwalka loogu talagalay fulinta MassCore ee beddelka waxbarasho.

Ansixinta Waaxda Dugsiga Hoose iyo Sare ee Koorsada Lagu Taliyay ee Shuruudaha Qalinjabinta Dugsiyada Boston Public School

Guddiga Dugsiyada ee Boston Public Schools waxay mas'uuliyad ka saaran tahay inay abuuraan siyaasado iyo dhaqanno taageeraya u diyaarinta arday kasta inuu noqdo kuleejo, xirfad iyo nolol diyaarna u ah kana saaro caqabadaha carqaladeeya ardayda ka qalin-jabineysa BPS oo diyaar u ah inay ku guuleystaan marxaladda xigta ee noloshooda. Sidaas awgeed, waa lama huraan in aan qaadano heerarka la jaan qaadaya shuruudaha qalinjabinta ee degmada oo dhan taasoo kor u qaadi doonta isla markaana hubin doonta adkaanta iyo heer sare ee dugsiyadeenna, taas oo keeneysa baabi'inta fursadaha iyo farqiga u dhexeeya iyo hubinta in arday kasta oo qalin jebiyaa uu isu diyaariyo nolosha dugsiga sare ka dib. Intaas waxaa sii dheer, waa inaan abuurno shuruudo qalin jabineed oo isdaba joog ah si qoysaska iyo ardayda ay u yeeshaan faham cad oo ku saabsan koorsooyinka loo baahan yahay in la dhammaystiro si ardaygu u helo dibloomada BPS.

Shuruudaha MassCore

Dugsiyada BPS waxay qaadan doonaan Maadada Daraasada ee MassCore ee Lagu Taliyay inay tahay Qalinjabinta looga Baahanyahay dhamaan ardayda degmada. Gaar ahaan, buundooyinka soo socda, ee qaybaha kala duwan ee maadooyinka ayaa looga baahan yahay ka qalinjabinta Dugsiyada DBoston Public Schools..

Sawirka hoose wuxuu si muuqaal ah u matalaayaa koorsooyinka looga baahan yahay qalinjabinta.

Safka 1	*Safka 2*	*Safka 3*
Nooca Nuxurka	Maadooyinka	Koorsooyinka
Farshaxanka Luqadda Ingiriisiga	4	1. _____ 2. _____ 3. _____ 4. _____
Xisaabta	4	1. AljabraII -AMA- Xisaabta isku dhafan (Aljabra) 2. _____ 3. _____ 4. _____ *Ardaydu sidoo kale waxay dooran karaan MassCore la mid ah koorsada Sayniska Kombiyuutarka*
Sayniska ku saleysan shaybaarka	3	1. _____ 2. _____ 3. _____ *Ardaydu sidoo kale waxay dooran karaan MassCore la mid ah STEM ama koorsada Sayniska Kombiyuutarka, oo ay ku jiraan AP CS*
Taariikhda iyo Cilmiga bulshada	3	1. Taariikhda Aduunka 2. Taariikhda Maraykanka 3. Daraasaadka Qowmiyadeed (Afrikan Amerikan, Latinx, Jasiirada Baasifiga ee Aasiya, Daraasaadka Dadka u Dhashay Mareykanka)
Luuqadaha Aduunka	2	1. _____ 2. _____ *Labada qayboodba waa isku luuqad.*
Waxbarashada Jirka	1	Ardaydu waxay yeelan doonaan hal rubuc koorso ah

		(ama wax u dhigma) oo ah waxbarashada jimicsi ahaaneed sanadkiiba ama isu geyn u dhiganta.
Farshaxanka	1	Ardaydu waxay yeelan doonaan hal rubuc koorso ah (ama wax u dhigma) Farshaxanka sanadkiiba ama isu geyn u dhiganta.
Xulashooyinka Muhiimka ah	5	1. _____ 2. _____ 3. _____ 4. _____ 5. _____ Waxaa ka mid ah Koorsooyinka Waxbarashada, Farsamada

Qeexitaano

Cutubyo iyo "Waqtiga Fadhiga"

Cutubku wuxuu metelaa sanad-waxbarasheed dhammaystiran oo waxbarasho ah ama u dhiganta maaddo daboolaysa dhammaan heerarka ku jira Qaab-dhismeedka Manhajka gaarka ah, laakiin macnaheedu maahan in ardaydu ay tahay “inay fadhiistaan” fasal saacado cayiman si ay u helaan buundo koorsada; halkii, ardaydu waxay muujiyaan hanashada aqoonta iyo xirfadaha ay metelaan cutub ka mid ah waxbarista. Ardaydu sidoo kale waxay ka heli karaan dhibco “imtixaan laga qaado,” soo kabashada, ama dardargelinta koorso, sida ku cad Kormeeraha Guud.

Koorsooyinka ku saleysan aqoonta

Koorsooyinka ku saleysan aqoonta, ee ay ardaydu ku hormarsadaan kuna kasbadaan buundo marka la muujiyo xirfaddooda, waxay xaq u leeyihiin tixgelin si ay ugu qalmaan dhibcaha MassCore. Tani waxay ka kooban tahay koorsooyin iyo aqoon sare oo lagu soo ururiyey isdiwaan gelin laba jeer ah

Shuruudaha Qalinjabinta Gobolka

Nidaamkani ma beddelayo mana beddelayo shuruudaha qalin-jabinta ee Waaxda Waxbarashada Hoose iyo Sare. Shuruudaha qalin-jabinta dugsiga sare ee gobolka waxaa ka mid ah dhinacyada taariikhda Mareykanka iyo cilmiga bulshada, waxbarashada jir dhiska, iyo kasbashada "go'aaminta aqoon ahaaneed"[ku gudubista buundooyinka Fasalada 10aad ee luuqada Ingiriiska iyo xisaabta iyo heerka dugsiga sare sayniska iyo teknolojiyadda/Imtixaannada Qiimaynta injineernimada ee Nidaamka Massachusetts (MCAS)]. Ardayda aan ku baasin imtixaanka MCAS, barayaashu waxay horumariyaan Qorshaha Aqoonta Waxbarasho (EPP) ee maadada(ooyinka). Ardaydu waxay ubaahanyihiin inay buuxiyaan shuruudaha koorsada ee EPP marka lagu daro buuxinta shuruudaha MassCore.

Waxbarashada Jirka

MassCore waxay ka tarjumaysaa shuruudaha sharciga ah ee ah in jimicsiga loo barto maadooyin looga baahan yahay dhammaan fasalada. Ardaydu waxay ku buuxin karaan shuruudaha iyadoo loo marayo barnaamij abaabulan oo hawlo jimicsi ah, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn: ka qaybgalka ciyaaraha oradkaa ee dugsiyada u dhexeeya, iskaatiga, xeegada, qoob ka ciyaarka, yoga, farshaxanka dagaalka, capoeira, ama dabaasha iyo waxqabad kasta oo jireed iyada oo loo marayo barnaamijyada dugsiga ku saleysan ama barnaamijyada bulshada. , ama daraasad madaxbanaan.

Xirfada iyo Waxbarashada Farsamada

Ardayda iska diiwaangelisay barnaamijka Cutubka 74aad ee DESE ee la ansixiyay waxay buuxin karaan shuruudaha MassCore iyagoon buuxinaynin farshaxanka iyo shuruudaha luuqadda adduunka. Shuruudaha farshaxanka iyo luuqada aduunka waa laga dhaafi karaa hadana ardayda waxaa si xoogan loogu dhiiri galinayaa inay qaataan koorsooyinkan.

Jadwalka Hirgelinta

Nidaamkani wuxuu dhaqan galayaa 1da Luulyo, 2022, taasoo ku xirnaan doonta dhammeystirka degmada iyo u gudbinta Guddiga Dugsiga ee qorshaha istiraatiijiyadeed ee halkan lagu xusay. Degmadu waxay hirgelin doontaa dhammaystirka MassCore iyadoo looga baahan yahay qalin-jabinta laga bilaabo dayrta 2022.

-dhamaad-